

Si wadajir ah!

Aan si wadajir ah uga wada shaqayno helitaanka bulsho nabad ah, caafimaad qabta, barwaaqana ku noolaanaysa!

Magaalada Minneapolis maamulkeedu waxuu rabaa inuu iskaashi lasamaysto dadka degan magaalada, hay'adaha xaafadaha ee neighborhood organizations ka loo yaqaan, iyo kambaniyada ganacsiga si gacan looga gaysto abuurida xaafado nabdoon, nadiif ah oo lagu noolaan karo. Laga bilaabo bisha Juun 13 keeda, baarayaal kasocda waaxda addega sharciyada ee Magaalada Minneapolis, ayaa imaanaya xaafadihiina, iyadoo muhiimada ujeedadoodu tahay guryaha banana ee aanan ladeganayn iyo kuwa marar badan laga helay xadgudub. Fadlan, booqo website kanaga minneapolismn.gov/regservices/ si aad uga hesho liiska ganacsiyada bixinaya qiima dhimis ku saabsan alaabta lagu dayactiro guryaha.

Aan siwadajir ah uga wada shaqayno in aan deegaanadeena kadhigno meelo wacan oo lagu noolan karo!

Hoos waxaa ku lifaaqan xadgudubyada ugu adan ee shaqaalaheenu lakulmaan:



Cawska dhaadheer iyo geedka ka dhex baxa cawska "weed" dhererkoodu waa inuu ka gaaban yahay sideed inji. Qandaraaslayaasha magaalada ayaa jaraya daaradaha guryaha aan waqtiga ku haboon la jarin.



Gaadiidka aan socon karin waa in aan lagu heyn guryaha la degan yahay. Waxaa ka mid ah gaadiidka banjarka ah iyo kuwa taargadoodu dhacday.



Qudaarta la beerto waa in aanay soo gaarin dhulka lagu socdo, wadooyinka iyo kuwa xaafadaha dhex mara. Waa in marshabiyeediga uu kor u furan yahay ilaa 7' iyadoo wadooyinka xaafadaha dhex marana la doonayo in ay kor u furnaadaan 14' Qandaraaslayaasha magaalada ayaa jaraya laamaha kor isaga xiran.



Daaradaha waa in laga nadiifiyaa qasahinka, haraaga iyo biraha duugga ah. Guryaha oo si haboon loo daryeelo waxa ay muujineysaa in dadku daryeelayaan xaafadahooda. Qandaraaslayaasha magaalada ayaa qaaday qashinka dheeraadka ah iyo haraaga.



Laamaha iyo keymuhu waxa ay soo jiitaan cayayaanka, dabna way dhaliyaan, laguma keydin karo daaradda guriga, waa in la isku xiraa oo la fogeeyaa. Qandaraaslayaasha magaalada ayaa qaadata keymaha aan si haboon loo fogeeyn.

Su'aalo?

Waxaanu diyaar u nahay in aan idin caawino! Macluumaad dheeraad ah iyo faahfaahin ku saabsan waxyaabaha aan eegeyno, kala soo xiriir bogga internetka ee minneapolismn.gov/inspections/.

Si aad u soo sheegto xad gudub ama haddii aad qabtaan su'aalo dheeraad ah, soo wac 311 ama 612-673-3000 telefoonada ka baxsan magaalada.